

## XAQIIQOYINKA KU SAABSAN KHARASHKA

Xafiiska Caymiska Baabuurta Norwayjiyaanka (TFF) waa urur wada shaqayn la leh dhammaan shirkaddaha caymiska baabuurta Norway ee bixiya masuuliyada caymiska ee baabuurta (caymiska gaadiidka). Dhammaan shirkaddaha caymiska baabuurta gudaha Norway waxaa si sharci ah looga baahanyahay inay xubno ahaadaan. TFF waxay xaqiijisaa magdhowga haddii qofka uu sababay dhaawac ama waxyeelo aan la aqoon, kuwa aan caymiska ku jirin ama wada baabuurta ajnabiga.

### Muxuu kharashku ku lug leeyahay?

Qof kasta oo leh baabuur diiwaan gashan waxaa ku waajib ah inuu lahaado masuuliyada ansaxa ah ee caymiska. Haddii aanad caymis gelin baabuurkaaga, waxaad bilaabi doontaa in kharashka lagugu soo dalaco 1 Maarso 2018 maalin kasta oo baabuurkaagu aanu caymis ku jirin.

### Waa imisa qiimahu maalintii?

Moped, tractor, motor vehicle, veteran vehicle: 50 NOK per day

Car, van, caravan, tracked vehicle, motorcycle, snowmobile: 150 NOK per day

Bus, truck: 250 NOK per day

### Maxaa loo bilaabay kharashkan?

Ujeedadda mashruuca kharashka waa in lagu dhiirigeliyo mulkiilayaasha baabuurta inay caymiska geliyaan baabuurtooda aan caymiska ku jirin.

### Sideen isaga ilaaliyaa kharashka?

Waxaad leedahay labba ikhtiyaar.

- inaad baabuurka caymiska geliso, ama
- aad u dhiibto bilaydhada ruqsadda *Statens vegvesen* (Maamulka Jidka Dad waynaha ee Noorway)

### Baabuurkee ayaa caymiska la gelinayaa?

Dhammaan baabuurta, sida gawaadhida, dhugdhuuleeyada balaadhan, mootooyinka, ATVyada, cagaf-cagyada iyo basaska, iwm, kuwaas oo leh bilaydhada lambarka ruqsada ama leh heerka in la diiwaangeliyo, waa in caymis la geliyaa.

### Baabuurtee ayaan caymis u baahnayn?

Caymiska gaadiidka waajibka ah loogama baahna kuwa diiwaanka lagala noqday, kuwa aan diiwaangashanayn, kuwa burburay ama baabuurta la xaday. Baabuurta isjiidka ah ama kuwa hoy ahaan loo isticmaalo midna uma baahna diiwaangelin.

### Laga bilaabo taariikhdee ayaa baabuurka la cayminayaa?

Baabuurku waa in caymiska la geliyaa laga bilaabo taariikhda iibka ama marka aad haddii kale yeelatay baabuurka.

### Kumaa ka masuul ah qaadashada caymiska baabuurka?

Waa masuuliyada mulkiilaha in caymiska la geliyo baabuurka.

### Mulkiilahu waxa uu ka masuul tahay caymis gelinta baabuurka xataa marka

- Lama isticmaalo
  - Waxaa keliya loo isticmaalaa wakhtiyada gaar ah muddada sanadka.
  - Xaalad ay shaqayn karto kuma jirto
- ... Ilaa inta bilaydhada ruqsaddu ku xidhanyihiin, baabuurka waa in caymis la geliyaa.

### Ka saarida diiwaangelinta

Baabuurka waa in diiwaanka laga saaraa haddii duqad ku dhacdo ama laga soo dhoofiyo dalka dibadiisa. Diwaan ka saarida waxaa lagu sameeyaa xaga *Statens vegvesen*.

### Macluumaadka khaladka ah ee diiwaanka baabuurka

Haddii aad u malaynayso in baabuurka diiwaankiisu uu khalad yahay, fadlan la xidhiidh *Statens vegvesen*.

### Kharashka aan la bixin

Haddii aad bixin waydo kharashka, Xafiiska Caymiyayaasha Baabuurta Norwayjiyaanka waxay kuu soo diri doonaan xusuusin oo waxay u gudbin doonaan sheegashada soo ururiska sharciga ah. Dhaqan ahaan, tan macnaheedu waxa weeye gaadhigaaga diiwaangelinta ayaa lagala noqon doonaa dhacdada lagu baadho jidka dhinaciisa. Fadlan ogow in ka saarida kharashka maalin laha ah ee hore aan la tirtiri doonin marka caymiska ugu dambayn la habbeeyay.

### Qadarka caymiska aan la bixin

Shirkada caymiska waxay leedahay xaqa ay ku joojiso caymiska gaadiidka haddii qadarka caymiska aan lagu bixin wakhti buure ah. Wadista baabuurka ee aan lahayn caymiska gaadiidka ansaxa ah waa mamnuuc, oo baabuurka waa in diiwaanka laga saaraa dhacda lagu baadho jidka dhinaciisa.